

ARIMO

Sanadkii 2014, reer Canada waxay qaateen ilaa 2.4 bilyan oo ah nidaamka raacitaanka gaadiidka caamka ah ee qaranka. Taasi waa koror dhan 29% tobankii sano ee la soo dhaafay. Tiiyoo ay tiradaas koror ee cajiibka ihi jirto, hadana ciriiriga baabuurta ee ka jira magaalooyinka waa weyni wuuba ka sii darayaa sanad walba oo inta badan magaalooyinka waa weyn waxaa ka sii socda ku safridda baabuurta gaarka loo leeyahay. Waxaa loo baahan yahay maal gelin hor leh si loo sii wado horusocodka magaalooyinka Canada, iyada oo lagu caawinayo hoos udhigidda qiiqa iyo tiigsiga lagu beegsanayo hadafyada isbaddelka cimilada.

Arin 1: Miisaaniyadda Gaadiidka Caamka ah

Marka ay magaalooyinka badankoodu maalgelin ku sameeyaan agabyada gaadiidka caamka ah (sida, subweeyo cusub, tareeno ama gadiidyo khafiif ah, iyo qiiq deyn hoosaysa ama eber ah), ilaa haatan ma jiro hal dollar oo ay dawladda federaalka ihi mashaariicdaas u qoondaysay. Iyada oo la bilaabayo miisaaniyaddii sanadlaha ee 2017–18, dawladda Konserfatifku waxay soo jeedinaysaa in la bilaabo miisaaniyad toos loogu asteeyo mashruuca agabyada gaadiidka caamka ah ee magaalooyinka Canada. Miisaaniyadda Federalku waxay ka bilaabanaysaa \$250 malyan ee sanadka 2017–18, taas oo usii kordhaysa \$500 malyan sanadka 2018–19, ka dibna gaaraysa \$1 bilyan sanadka 2019–20 iyo sanadaha ka sii dambeeya. Qaaraanka uu dhiibayo federalku wuxuu ku istaagaysaa wax aan ka badnayn 25% oo ah guud ahaanba qiimaha mashruuca, waxaana lagu xiray shardi ah in dhismaha agabyada gaadiidka caamka ah ay qandaraas ku qaataan Shirkado Gaar loo Leeyahay ee Guud (P3s). Federalka NDP ayaa dhawaan ku dhawaaqay inay maal gelin dhan \$1.3 bilyan gelinayaan sanad walba muddo 20 sanadood ah iyadoo xoogaa xargo ah ku xireen qorshaha Konserfatifka.



Arin 2: Ka dhig Gaadiidka Caamka ah mid la isugu Celiyo Canshuur

Canshuur Celinta Gaadiidka Caamka ah waxaa soo hindiy dawladda federalka sanadkii 2006, waa mid ka mid ah khaanada canshuur celineed ee ay keentay dawladda Harper. Nidaamkaan canshuur celis waxa uu keenay jiha wareer hor leh, laakiin waxaa jira caddaymo yar oo tusinaya inay gaarayaan hadafkoodii ay dhegsadeen. Canshuur Celiska Gaadiidka Caamka ah, tusaale, waxa uu dhaliyey inay gaadiid raacayaal badani iibsadaan karaka billaha ah (kaas oo xaq u siinaya in loo canshuur celiyo), iyada oo lala barbar dhigayo iibsashada tigidhada qof maalin ku safarka (kuwaasoo aan xaq u siinayn), laakiin taasi waxba kuma kordhin tirade dadka gaadiidka raaca. Haatan, Canshuurta federalka ee Gaadiidka Caamka ihi ma ahan mid celiyo. Gaadiid raacayaasha hasyta waraaqo habboon waxay xaq u leeyihiin inay dalbadaan canshuur celis dhan 15% oo laga qaadayo dakhliga canshuurta federalka ee la qabo. Sidaa awgeed, kuwa xareeya dakhli sarreeya waxay helayaan faa'iido ka badan inta Canshuur Celinta Gaadiidka Caamka ah ee ay xareeyaan kuwa xareeya dakhliga hooseeya ama dhexdhexaadka ah.

Su'aalo

1. Dakhli waxtar leh ayaa loo baahan yahay si loo buuxsho farqiga udhexeeya agabyada Canada. Waa maxay qorshaha xisbigaaga ee ku aaddan dakhliga loo baahan yahay si loo horumariyo agabka gaadiidka caamka ah?
2. Heerkee ayuu xisbigaagu rabaa inuu ka ballan qaado miisaaniyadaa federalka? Waa maxayse waqtiga uu ku fulinayaa? timeframe?
3. Xisbigaagu ma doonayaa in mashaariicda dhismaha agabyada la fuliyo iayadoo loo isticmaalayo P3s?
4. Xisbigaagu ma ka dhigayaa Gaadiidka Caamka ah ee federalka mid aqbalsan Canshuur Celinta faaiidada GST?

Ilo:

Faah faahin dheeri ah iyo warqado xaqiiqooyina taxanahaan ku saabsan: <http://spno.ca/canada-votes-2015>

Translated by: African Canadian Social Development Council (ACSDC)

